Arbetsförmedlingen

Ersättning från a-kassan -
Information om ekonomisk ersättning när du är arbetslös

2015-11

Lacagta magdhabidda ee qasnadda shaqo la’aanta

Warbixin ku saabsan dhaqaalaha maqdhabidda marka aad shaqo la’aan tahay

Inta aad shaqo raadinta ku jirto ayaa waxaad lacag magdhabid ka heli kartaa qasnadda shaqo la’aanta. Lacagta magdhabidda waxay kaa magdhabeysaa qayb ka mid ah dakhliga aad heli lahayd haddii aad shaqeyn lahayd. Si aad ku hesho lacagta magdhabidda ayaa waxaa waajib ah inaad ka soo baxdo sharuudo qaarkood.
Haddii aad xubin ka tahay qasnad shaqo la’aanta ugu yaraan hal sanno laakiinse xitaa qofka aan xubin ka ahayn qasnadda shaqo la’aanta waa uu heli karaa magdhabidda.

Waxaa jira 28 qasnadaha shaqo la’aanta ee kala duwan oo ka jira faracyo kala duwan. Haddii aadan hore xubin uga noqon qasnad shaqo la’aan waxaad la xiriiri kartaa qasnadda aad rabto inaad ka mid noqoto. Waxaad warbixin dheeraad ka akhrisan kartaa bogga internetka ee www.samorg.org/om-arbetsloshetsforsakringen ama www.arbetsformedlingen.se/a-kassa.

Maxaa layga baahan yahay si aan u helo lacagta magdhabidda?

Si aad uga hesho lacagta magdhabida qasnadda shaqo la’aanta ayaa waxaa ah inaad marka hore buuxiso shuruudaha aasaasiga. Taasina waxay la mecne tahay inaad

- Iska diiwaan gelisaa oo aad iskaga qortaa xafiiska shaqada inaad tahay shaqo laawe
- Awoodaa inaad shaqo bixiye u shaqeyn karto ugu yaraan 3 saacadood maalin walboo shaqo ah iyo celcelis ahaan 17 saacadood todobaadkiiba.
- Haddii kale diyaar u tahay shaqo , taasoo loola jeedo inaad niyad u haysto inaad shaqeyso oo aadan lahayn wax kaa hor istaagaya shaqada.

.

Xitaa waa inaad fulisaa shuruudo shaqo. Taasoo mecnaheedu yahay inaad waqti ku filan aad hore u soo shaqeysay. La xiriir qasnadda shaqo la'aanta aad ka tirsan tahay ama aad rabto inaad ka mid noqoto haddii aad rabto inaad warbixin dheeraad ah ka ogaato ama aad dalbato lacagta magdhabidda shaqo la'aanta.

Maxay tahay inaan sameeyo ilaa iyo waqtiga aan qaadanaayo lacagta magdhabidda?

Marka aad ka hesho qasnadda shaqo la'aanta lacagta magdhabidda ayaa waxaa muhiim ah inaad shaqo u raadsato habka aad adiga iyo xidhiidhiyahaaga shaqada ku heshiiseen. Taasina waxay la mecne tahay inaad

- La soo saari doonto mas'uulka xiriiriyaha shaqada qorshe waxqabad ee shakhsi.
- U soo gudbiso warbixinta dhaqdhaqaaqa hawlahaaga xafiiska shaqada waqti fiican.
- Soo booqato ama la soo xiriirto xafiiska shaqada ama shirkadaha ama ururada uu xafiiska shaqada la leeyahay saacadaha aad ku heshiiseen.
- Raadso shaqooyinka aan ku qiyaasnay iney kuu qalmaan ee kuugu habboon .
- Raadso shaqooyin kale oo aad adiga laftaada u aragtay iney kuugu habboon yihiin.

Waxaa kaloo muhiim ah inaadan sii dheereynin xilliga aad shaqo la'aan tahay adigoo

- Diidaya shaqo kuugu habboon
- U dhaqmaya hab ka yeelaya inaan lagu shaqaaleenin.
- Diidaya barnaamijka siyaasadda suuqa shaqada ee goobta aad ka hesho lacagta gargaarka firfircoonida (aktivitetsstöd).

Waxaa kaloo aadan sababi karin inaad shaqo la'aan noqoto adioo

- Iskaga tegaya shaqadaada sabab macquul ah la'aanteed
- U dhaqmaya hab shaqada lagaaga joojinayo
- Ka tegaya barnaamijka siyaasadda suuqa shaqada ee goobta aad ka hesho lacagta gargaarka firfircoonida.
- U dhaqmaya hab sababaya xafiiska shaqada inuu doorto inuu joojiyo barnaamijka siyaasadda suuqa shaqada ee goobta aad ka hesho lacagta gargaarka firfircoonida(aktivitetsstöd).

Soo wargeku haddii wax isbedelaan!

Soo ogeysii qasnadaada shaqo la'aanta waxyaabaha saameyn ku yeelan kara lacagta magdhabida,tusaale ahaan haddii aad bilowdo shaqo ama waxbarasho.
Soo wargeli xafiiska shaqada haddii aad iska bedesho cinwaankaaga , cinwaankaaga elektarooniga ama lambarka telefoonka si aan mar walba kuugula soo xiriir karno.

Ma dooneysaa inaad ka shaqeyso dibedda dalka?

Maka soo shaqeysay waddan ku jira waddamada EU/EES ama waddanka iswitserlaand? Ama maku fekereysaa inaad shaqo ka raadsato waddamada dibedda? Markaa waxaa jira qawaaniin gaar ah. La xiriir qasnadaada shaqo la'aanta haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato.

Xafiiska shaqada waxyaabahan buu qabtaa

- Wuxuu wargeliyaa qasnadda shaqo la'aanta marka aad iska diiwaan geliso shaqo laawe ahaan xafiiska shaqada.
- Wuxuu hubiyaa inaad ka soo baxdo shuruudaha looga helayo lacagta magdhabidda qasnadda shaqo la'aanta
- Wuxuu u dirayaa farriin qasnaddaada shaqo la'aanta haddii
    - Aadan fulin shuruudaha
    - Aadan u raadin shaqo habka adiga iyo xafiiska shaqada go'aan ku gaarteen
    - Aad dheereeso waqtiga aad shaqo la'aan tahay
    - Aad adiga laftaada sababto inaad shaqo la'aan noqoto

Qasnadda shaqo la'aanta waxyaabahan bey qabataa

- Waxay baaritaan ku sameysaa kadibna go'aan ka gaartaa haddii aad xaq u leedahay lacagta magdhabida inaad ka hesho qasnadda shaqo la'aanta
- Go'aan ka gaartaa inta lacag ee aad u heli karto magdhabid ahaan
- Waxay ku siineysaa ku siineysaa lacagta magdhabidaada

- Waxay jawaab ka bixisaa su’aalo ku saabsan lacagtaada magdhabidda
- Waxay go’aan ka gaartaa haddii aad qaadaneyso lacag magdhabid cadad yar ayadoo ay saldhig u tahay in xafiiska shaqada uu farriin u diray qasnadda shaqo la’aanta .